## Maxaan filan karaa inta dhismaha socdo?

Dhismuhu waxa lagu samayn doonaa qaybqayb (marba hal baloog) si carqaladaha muddada kooban ah ee xaafadda soo gaarayo, sida buuqa iyo siigada, loo yaree-yo inta suurtogalka ah. Urta bullaacaduhu ma soo gaari doonaan guryaha, laakiin waxa laga yaabaa inay bannaanka ka soo uraan.

Inta uu dhismuhu socdo, dadka deegaanka waxa ay filan karaan in ay arkaan qalab waddada dhex yaal iyo astaamo cusub oo taraafikada lagu hagayo, sida hoos ku qoran:

- Xiridda waddo ee qayb ahaan ama si buuxda
- Xiritaanka wadada dadka ku lugeeyaan
- Baarkinka waddada oo la xaddido
- Waddo leexin suuragal ah






## Adeegyadayda saamayn ma gaari doontaa?

Dadka deegaanka waxaa laga yaabaa inay la kulmaan adeegyada bullaacadaha iyo biyaha oo si ku-meelgaar ah hakad / isticmaalkooda loo xaddido. Dadka deegaanka ayaa la sii ogeysiin doonaa dhismaha waxaana la bixin doonaa faahfaahinta waqtigaas.

## Sidee loo maalgelinayaa mashruucan?

Bulaacadda Buffalo waxa uu mashruucan ku bix-in doonaa deymo dulsaarkooda yar yahay, waxana uu raadin doonaa deeqaha gobolka New York si uu u kabo maalgelinta mashruuca

## Halkeen ka heli karaa macluumaad dheeraad ah?

Wixii macluumaad dheeraad ah, fadlan wac/ iimayl u dir Bullaacadaha Buffalo ama iskaan ka qaad lambarka QR ee hoose si aad u aragto mareegahayaga macluumaadka ku saabsan arrinkan iyo mashaariicda kale ee hadda socda.

**716-851-4664**

**QueenCityCleanWaters@buffalosewer.org**

BUFFALO SEWER AUTHORITY

1038 City Hall
65 Niagara Square
Buffalo, NY 14202

BUFFALO SEWER AUTHORITY

# Breckenridge Street Kontoroolka CSO

### Macluumaadka Mashruuca



## Waa maxay sababta Bullaacadaha Buffalo u samaynayso mashruucan?

Bullaacadaha Buffalo waxay si dadaal leh uga shaqaynaysaa sidii ay u hagaajin lahayd kaabayaasha bulaacadaha ee Magaalada si kharash-ku-ool ah taasoo hoos u dhigi doonta butaaca bulaacadaha isku-dhafan (CSOs) ee saameeya biyaha dusha sare. Mashruucani waxa uu bedeli doonaa/dib-u-habayn ku samayn doona bulaacadaha da'doodu ka weyn tahay 100 sano waxana uu u jiheynayaa waddo kale oo loo maro warshadda nadiifinta biyaha wasakhda ah. Khadka biyaha ee West Ave.

## Maxaa ka qayb ah mashruucan?

**West Ave. (laga bilaabo Breckenridge St. ilaa Lafayette Ave.):**

- Bullaacad cusub oo la isku-dhaf ah
- Beddelka bulaacadaha isku dhafan ee dhinac kasta
- Dib-ugu-xiriirinta geesaha guriga/dhismaha
- Xarun biyo oo cusub oo aan lahayn Balambam
- Ku beddelashada adeeg kasta oo balambamka biyaha ah adeegyo cusub oo naxaasta ah
- Laami cusub oo gees ilaa ka gees ah


**Breckenridge St.** (laga bilaabo West Ave. ilaa Herkimer St.):

- Dahaarka iyo hagaajinta bulaacada isku-dhafan ee jiray

## Goorma ayay dhismaha bilaabmi doontaa?

- Dhismaha waxa loo qorsheeyay in la bilaabo Gu'ga 2026 waxayna dhamaanaysaa 2028.
- Ogeysiisyada waxaa gacanta loogu geyn doonaa dadka deegaanka ugu yaraan hal toddobaad ka hor inta aan dhismuhu bilaabmin iyadoo maclu-umaad faahfaahsan la bixin doono.

## Aagga mashruuca




© Google Maps—Image Source